

Waalidka ama Masuulka Qaaliga ahoow:

Ayadoo qayb ka ah dadaalkeena taageerida Whole Child (Ilmaha oo Dhan), dugsigeenu wuxuu dhaqan galinayaa tijaabada guud ee hormarka bulshanimada iyo dareenka ee ardayda.

Tijaabada guud ee hormarka bulshanimada iyo dareenka ayaa bixin karta qaab cadaalad oo muhim u ah hubinta sida ardaydu hormar uga samaynayaan kobaca bulshanimada iyo dareenka. Tijaabinta ayaa sidoo kale gacan ka gaysan karta aqoonsiga meelaha shaqaalaha dugsigu hormarka ka samaynayaan ama kordhinayaan taageerada ay ku baxshaan.

Tijaabada guud ee hormarka bulshanimada iyo dareenka **MAAHA** imtaxaan ama qiimayn. Taas badalkeed, tijaabooyinku waa farsamo muhiim u ah aqoonsiga ardayda u baahan kara taageerada dheeraadka ah ee dhinacyada bulshanimada iyo ama dareenka.

Denver Public Schools waxay hadda adeegsataa foomka su'aalo waydiinta tijaabada hormarka bulshanimada iyo dareenka oo loo yaqaano Nidaamka Tijaabada Habdhaqanka iyo Dareenka (BESS). Farsamada oonleenta ah ayay qaadanaysaa in lagu dhammeeyo ku dhawaad ​​toban daqiiqo waxaana ku jira 28 su'aalood oo ardaygu ka jawaabaayo.

Tijaabada hormarka hormarka bulshanimada iyo dareenka ayaa la sameeyaa laba ilaa sadex jeer inta sanad dugsiiyeedku socdo. Tijaabinta joogtada ah ayaa gacan naga siinaysa inaan go'aamino haddii taageerooyinka aan sino ardayda ay waxtar u leeyihiin buuxinta baahiyahooda.

Waxaad xaq u leedahay, marka aad codsato inaad akhrido su'aalaha ku qoran foomka su'aalo waydiinta. Haddii aad doonayso inaad akhrido su'aalaha ku qoran foomka su'aalo waydiinta hormarka bulshanimada iyo dareenka, fadlan la xariir: _____.

Waxaad sidoo kale ikhtiyaar u leedahay inaad KA REEBTO cunugaaga ka qaybgalka tijaabada. Haddi **AADAN** donayn in cunugaagu ka qaybgalo tijaabada hormarka bulshanimada iyo dareenka, fadlan sheeg adoo saxiixaaya soona celinaaya foomkaan.

Haddii aanaan foomka DIIDMADA kaa helin, waxaan u qaadan doonaa inaad dooratay in cunugaagu ka qaybgalo tijaabada hormarka bulshanimada iyo dareenka.

Waad kumahadsan tahay caawimaadaada anagoo kawada shaqaynayna inaan waxbarno aana taageero siino ardaygaaga!

Mahadsanid,
Wakiilka Dugsiga

Magaca Cunuga: _____

Ma doonaayo inuu cunugaygu ka qaybgalo baaraha bulshanimada iyo dareenka oo qayb ka ah Tijaabada Guud sidaas awgeed na waan **DIIDAY** sida aan saxiixayga hoose ku cadeeyay.

Saxiixa Waalidka/Masuulka

Taariikhda

Fadlan foomkaan ku celi: _____